

Manager foodborne illness video script in Somali

Fiidiyoowga baaritaanka xanuunada dillaaca: maareeyaha

Maareeye ahaan waxaad filan karto into lagu guda jiro baaritaanka xanuunka cuntada ka dillaaca

Haddii aad daawaneysid fiidiyowgan, waaxda caafimaadka ee deegaankaaga ayaa kaala soo xiriiray warbixinno ku saabsan xanuun cuntada ka dillaaca oo ay suuragal tahay inuu saameeyay meheradaada.

Shaqaalaha Waaxda Caafimaadka ayaa wada baaritaan la xiriira xanuunkan dillaacay. Waaan kula shaqeyn doonaa si aan degdeg ugu gunaanadno baaritaanka si aan u xadidno wixii hakad ah ee ku iman kara ganacsigaaga.

Xanuunka cunnada ka dillaacaa waa midka ay ku xanuunsadaan laba qof ama in ka badan oo isla cunto wada cunay.

Xanuunka cunnada ka dillaacaa wuxuu sababi karaa matag iyo shuban ama calaamado kaloo daran oo horseedi kara in qofka isbitaal la dhigo ama uu u dhinto.

Xanuunka cunnada ka dillaacaa wuxuu saamayn karaa hal makhaayad oo keliya - sida marka cuntada aan si bedqab lahayn loo diyaariyo, ama shaqaaluhu soo shaqo tagaan iyagoo xanuunsan.

Sidoo kale, xanuunka cunnada ka dillaacaa wuxuu saamayn karaa ilaha cuntada laga soo iibsado - sida cunto wasakhaysan oo dad badan ku xanuunsadaan kuwaasoo cuntadaa ku cunay meelo kala duwan.

Xanuunadu way faafi karaan xitaa marka la raaco hab-dhaqamada wanaagsan ee fayidhowrka cuntada.

Waxyaabaha aad filan karto inta baaritaankan lagu jiro.

Kormeerayaal ka socda Waaxda Caafimaadka ayaa imaan doona meheraddaada. Waan kula shaqeyn doonaa si aan u ogaano sababta keentay dillaaca xanuunka iyo joojintiisa.

Kormeeraha ayaa laga yaabaa inuu kaala hadlo:

- Sida meheraddaadu u shaqeyso
- Cunnada aad iibiso
- Haddii macaamiishu sheegeen inay xanuunsadeen
- Haddii qof shaqaale ahi uu xanuunsanaa
- Xeerka u yaala caafimaadka shaqaalahaaga

Kormeerahaagu wuxuu kaloo kuu sheegi doonaa dukumiintiyada aan u baahan nahay inaanu eegno sida:

- Liiska saxda ah ee shaqaalahaaga iyo lambarrada taleefankooda
- Rasiidhada aad cuntada ku soo iibsatay
- Rasiidhada macaamiisha aad siisay
- Liisaska “reservation-ka” ama boos celinta
- Rasiidhada alaabada laguu keenay

Kormeer ayaa makhaayadaada lagu samayn karaa si loo aqoonsado waxyabaha khatartu ka iman karto ee keena xanuunka cunnada ka dillaaca ee aan baarayno.

Waxaan kaloo shaqaalaha iyo maareeyayaasha shaqsi ahaan ka wareysan karnaa shaqooyinkooda, jadwalkooda shaqada, ama xanuunadoodii ugu dambeeyay.

Fadlan noo sheeg haddii ay jiraan shaqaale u baahan turjubaan.

Macluumaadka shaqaalaha cuntada diyaariya waa mid muhiim u ah baaritaankayaga waana mid aad cidna lala wadaagayn.

Dhamaystir la'aanta waraysigan wuxuu ka hor istaagi kartaa in shaqaalaha uu shaqadiisii ku noqdo.

Ka hor intaanan imaan, la wadaag shaqaalaha Fiidiyowga Baaritaanka Xanuunada Dillaaca ee Shaqaalaha. Fadlan hubi inay daawadeen - maxaa yeelay waxay ku wargelin doontaa waxa laga filayo, waxayna u sharxi doontaa doorkooda ku aadan baaritaanka.

Waxaan ku kalsoonahay in haddaan wada shaqeyno aan si dhaqso leh oo wax ku ool ah ku soo afjari karno xanuunka cuntada ka dillaacay.

Macluumaad intaas ka badan kala xiriir waaxda caafimaadka deegaankaaga ama Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada (CDC).

For reasonable accommodations or alternative formats please contact Environmental Health at health@minneapolismn.gov or 612-673-2301. People who are deaf or hard of hearing can use a relay service to call 311 at 612-673-3000. TTY users call 612-263-6850.

Para ayuda, llame al 311. Rau kev pab 311. Hadii aad Caawimaad u baahantahay wac 311.

minneapolismn.gov/food-illness